# JOOJIYA CADAALADDARADA HOYGA

Kumanaan Iswiidhish ah ayay dhibaato ka haysataa guri la'aan, hoy ciriiri ah, dayactir qaali ah iyo kirada guryaha cusub oo qaali ah. Isla markaas ayay dawladu balaayiin galineysaa dadka haddaba guryahooda iska leh. Waxay dadka oo dhami xaq siman u leeyihiin inay guri ay leeyihiin oo ammaan ah helaan. Waxaanu doorashada soo socota ee deyrta dalbaneynaa inay siyaasiyiintu cadaalad darada ka taagan siyaasadda guriyeynta iyo suuqa guryaha joojiyaan.

Wuxuu ururka kireystayaashu soo jeedinaya:

– **Guryo badan oo xuquuqda kireysiga leh oo kiradoodu macquul tahay.** Waxa Iswiidhan ka jirta guri la'aan aad u weyn oo dadka dhalinyarta ah ku qasbeysa inaanay guriga reerkooda ka guurin, qoysas dhistaan iyo inaanay dadka waayeelka ahi guri ku haboon helaan. Waxaanu rabnaa sida ay boqolkiiba 70 dadka iswiidhishka ahi rabaan, in la dhiso guryo badan oo xuquuda kireysashada leh oo kiro macquula ah.

– **Dib u cusbooneysiin waarta - Joojiya biilasha cusboonaysiinta.** Marka uu mulkiiluhu rabo inuu guriga dib u cusboonaysiiyo, ayay maanta kiraysteyaal badani la kulmaan kor u kac kirada oo boqolkiiba 60 ama wax ka badan ah. Taasi macquul ma aha. Ma aha in kireystana lagu qasbo inuu guuro maadaama oo kirada si xun loogu kordhiyay markay tahay in gurigooda dib loo dayactiro.

– **Cadaalad laga simo guryaha la leeyahay iyo kuwa la kiraysto.** Waxay dawladu sanad walba balaayiin ku kharasheysaa cashuur dhimista dadka guryahooda leh loo sameeyo. Waxay taasi keeneysaa in guryaha kirada ee cusubi noqdaan qaar bishiiba ilaa 2500 karoon ka qaalisan marka la qarab dhigo guryaha xuquuqda lahaanshaha leh ee u dhigma. Waxa weeye wakhtigii cadaalada laga simi lahaa qaababka kala duwan ee deganaanshaha.

Hyresgästföreningen

# Dooro kiro ammaan ah halkii aad cadaalad darada hoyga ka dooran laheyd

Maxaad ka qaban kartaa?

**– Codkaaga dhiibo doorashada 11 Sibtember.** Boggahyresgastforeningen.se  ayaad ka ogaan kartaa siday xisbiyada siyaasadda ee kala duwani u arkaan arrinta guryaha. Shuruud ku xidh siyasiyiinta oo codkaaga mid la maqlo ka dhig.

**– Ururka kiraystayaasha ka noqo xubin**. Waxaanu ka shaqeynaa sidii cadaalad darada guryaha loo joojin lahaa iyadoo aanu siyaasiyiinta iyo kuwa awooda leh saameyn ku yeelano. Waxaad xubin ahaan aad sidoo kale heli kartaa caawimo sidii aad gurigaaga ugu saameyn laheyd iyo talobixin ku saabsan xuquuqdaada kirayste ahaan.

**– Ka qeybqaado ololaha.** Marba marka aynu ka sii badano dadkeena dalbanaya inay siyaasiyiintu cadaalad darada hoyga joojiyaan, ayay fursadda aynu taas ugu guuleysanaynaa ka sii weyntahay. Ururka deegaankaaga/gobolka ku yaala la xidhiidh si aad ololaha uga qeybqaadato oo baraha bulshada nagala soco.

**Wax dheeraad ah ka sii akhriso hyresgastforeningen.se**

Hyresgästföreningen